

SU'AALAH SOO NOQNOQDA (FAQ) TIRAKOOBKA 2020:

Waa maxay tirakoob?

Tirakoobka waa tirinta qof kasta oo ku nool Mareykanka iyo xuduudahiisa. Wuxuu dhacaa 10-kii sanaba mar. Horraanta 2020, waxaa lagu weydiin doonaa inaad tiriso qof kasta oo gurigaaga ku nool laga bilaabo Afaraad 1. Ka jawaab celinta Tirakoobka 2020 waa fursad aad ku qaabaynayso mustaqbalkaaga.

Maxaa igu jira aniga?



Jawaabahaagu waa wargalin in ka badan \$ 675 bilyan ayaa loo qaybiyaa bulshooyinka dalka oo dhan si loogu helo goobaha caafimaadka, iskuulada, wadooyinka, iyo kuwo badan.



Xogta tirakoobka ayaa siisa hoggaamiyeyaasha bulshada macluumaad muhiim ah si ay go'aan uga gaaraan dhismaha xarumaha bulshada, furitaanka meheradaha, iyo qorsheynta mustaqbalka.



Ka jawaabistaadu waa buuxintii waajibaadkaaga muwaadinimo maxaa yeelay waxaa waajib ka dhigaya Dastuurka Mareykanka. Mareykanka ayaa tiriya dadkiisa 10-kii sanaba hal mar laga soo bilaabo 1790.



Jawaabahaaga waxaa loo isticmaalaa in dib loogu habeeyo degmooyinka sharci dejinta iyo go'aaminta tirada kuraasta ee gobolkaagu ku leeyahay Mareykanka. Golaha Wakiilada.

Xogteyda mala xifidinayaa?

Jawaabahaaga ku saabsan Tirakoobka 2020 waa mid aamin ah, la sugay, oo uu xafiday Sharciga Federaalka. Jawaabahaaga waxaa loo isticmaali karaa oo keliya in lagu soo saaro tirakoob. Iooma adeegsan karo wax liddi kugu ah haba ahaato hay'ad dawladeed ama maxkamad sinaba - sida FBI, CIA, DHS, iyo ICE.

Goormaanjawaabsiin karaa tirakoobka?

Horraantii 2020, Qoys kasta oo Ameerika ku nool ayaa heli doona ogeysiis si ay u dhammaystiraan tirakoobka onlineka ah, taleefaka ah, ama boostada ah. Bisha Shanaad, Xafiiska Tirakoobka Maraykanku wuxuu bilaabi doonaa dabagalka qoysaska aan wali jawaabin.

Macluumaad dheeri ah, booqo:

2020CENSUS.GOV

D-FA-GP-EN-034

Maxaa la iweydinayaa?

Waxaa lagu weydiin doonaa su'aalo yaroo fudud, sida da'da, jinsiga, iyo tirada dadka ku nool gurigaaga, oo ay ku jiraan carruurta.

Maxaan la iweydiin doonin?

Tirakoobku kuma weydiin doono sinaba lambarada Social Security, bangiga ama lambarada kaadhka deynta (Credit Card), lacag ama tabaruc ama waxkasta oo la xiriira xisbiyada siyaasadeed.

Shape
your future
START HERE >

United States®
Census
2020